



REF: HAN/ 1-0231

17-May-2012

Ku: Mudane Cabdiraxman Maxamed Cabdilaahi (Cirro)

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda JSL

=Hargeysa=

OG: H.E. Ahmed Mahamed Mahamoud

M a d a x w e y n a h a JSL

=Hargaysa=

UJEEDO: XISAAB-XIDHKA SANADKA 2009

Mudane Gudoomiye,

Tixraac warqadaada sumadeedu ahayd GW/04/95/2011, ee 04/10/2011 kuna saabsanayd Xisaab-xidhada Miisaaniyaddaha sanadaha 2007, 2008, iyo 2009.

Anagoo fulinayna qodobka 55^{aad} ee Dastuurka JSL, Xubintiisa 7^{aad} iyo Xeerka Nidaamka Maamulka Xisaabaadka Dawladda Qodobkiisa 7^{aad} Xubintiisa 2^{aad} Xarfahiisa A, iyo C iyo Qodobka 16^{aad} Xarfahiisa A, B iyo C ee Xeerka Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Qaranka.

Kuwaas oo dhamaantood jidaynaya Waajibaadka ku aadan Xisaab-xidhada Miisaaniyadaha Qaranka JSL.

Sidaad darteed Waxa aanu si Xushmad iyo Qadarinba leh kuugu soo gudbinaynaa Xisaab-xidhka Miisaaniyadda Sanadka 2009, oo ah sidan soo socota:-

Mohamoud Aw Abdi Ibrahim

Hantidhowraha Guud ee Qaranka JSL

A. DAKHLIGA GUUD EE 2009

Ku tala-galka Dakhliga Miisaaniyadda caadiga ah ee 2009 wuxuu dhamaa SLSh, **265,190,104,732**. Dakhliga dhabta ah ee sanadka soo xerodayna wuxuu dhamaa **SL Sh 261,993,714,286**. Waxaana dakhli hoos u-dhacay SLSh **3,196,390,486** sida hoos ku qoran:-

Isbarbar-Dhiga Dakhliga Guud ee Sanadka 2009

Madaxa	Nooca	Ku tala-galka	Dakhliga dhabta ah	faraqa
1.1.0	Cashuurta isticmaalka dhaqdhaqaaqa	202,426,084,207	222,256,562,237	19,830,478,030
1.2.0	Cashuurta wax soo saarka	282,476,727	291,592,000	9,115,273
1.3.0	Cashuurta dakhliga	23,506,137,832	21,445,971,532	(-) 2,060,166,300
3.1.0	dakhliga Hantida dawlada Qaranka	28,764,912,443	5,820,052,385	(-) 22,944,860,058
4.1.0	Dakhliga alaabta iyo hawsha	10,210,493,532	12,179,536,092	1,969,042,569
	Isugayn	265,190,104,432	261,993,714,246	(-)3,196,390,486

B. KHARASHKA GUUD EE 2009

Ku tala-galka miisaaniyadda ee kharashka guud ee sanadka 2009, wuxuu dhamaa SL Sh **265,190,104,732**. Kharashka dhabta ah ee baxay sanadka 2009 wuxuu dhamaa SL Sh **258,496,237,034**, kaas oo ka yar ku talo galkii lacag dhan SL Sh **6,693,867,698**. Sida ku faah faahsan bogoga soo socda ee warbixintan

C. XISAABAADKA MIISAANIYADA CAADIGA AH KA BAXSAN 2009

Lacagaha Xisaabaadka Miisaaniyadda caadiga ah ka baxsan (Below the line of Accounts) ee 2009, waxay kala ahaayeen sidan soo socota:-

s/no	Nooca	Kharashka SLSh	Dakhluga SLSh	Faraqa
1	Hurumarinta	44,164,339,141	26,849,099,901	(-) 17,315,239,240
2	Curaarta	65,178,486,351	58,774,257,580	6,404,228,771
3	Imprest-ka	254,078,000	254,078,000	NIL
4	Xawaaladaha	209,011,877,391	209,011,877,391	NIL
	Isugayn	318,608,780,883	294,889,312,872	(-) 23,719,468,011

Soo koobida xisaab-Xidhka Guud ee 2009 Summary of statement of accounts, for 2009

S/n	Faahfaahin	Dakhluga SL SH	Kharashka SL SH
1	Miisaaniyada caadiga ah 2009	261,993,714,246	258,496,237,034
2	Xisaabaadka baxsan miisaaniyda caadiga ah	294,889,312,872	318,608,762,883
3	Hadhaaga Khasnada 2009	20,221,972,799	
4	Isku gaynta	577,104,999,917	577,104,999,917

Isku Dheelitirka Khasnada iyo Baanka ee 2009
Reconciliation of statement of Treasury and Bank for 2009

S/n	Faahfaahin	Dakhliga SL SH	Kharashka SL SH
1	Miisaaniyada caadiga ah 2009	261,993,714,246	
2	Xisaabaadka baxsan miisaaniyada caadiga ah	294,889,312,872	
3	Dakhliga khasnada galay	566,883,027,118	
4	Dakhliga 2008 ee baanka galay 2009	25,593,903	
5	Kharashka 2008 ee aan Baanka gelin	260,850	
6	Kharashka Guud ee Baanka		577,104,999,917
7	Kharashka 2008 ee Baanka gelin 2008		7,883,553
8	Casaanka Baanka 31,Dec, 2008		46,115,407,594
9	Casaanka Baanka 31,Dec, 2009	66,319,409,193	
		623,228,291,064	623,228,291,064



GABOGABO

Sida muuqata Waxa ka soo if-baxay baadhista xisaabaadka miisaaniyada sanadka 2009, in dakhliga dhabta ah ee Miisaaniyada caadiga uu dhamaa SL Sh **261,993,714,246**. Sidoo kalana kharashka dhabta ah ee Miisaaniyada caadiga ahi uu dhamaa SL Sh **258,496,237,034**, taas oo muujinaysa in uu Dakhliga miisaaniyada caadiga ahi uu ka badan yahay kharashka lacag dhan SL Sh **3,497,477,212**, iyo sidoo kale in la galay kharashyo dheeraad ah oo kala ah horumarin (advance) oo dhamaa SL Sh **17,315,239,240**, iyo kharash isna ah Curaar (deposit) oo dhamaa SL Sh **6,404,228,771**. kharashyadaas oo ka baxsan Miisaaniyada caadiga ah ee 2009. Taas oo laga daboolay hadhaaga lacagta Miisaaniyada caadiga ah Iyo lacag dayn ah oo laga daysaday baanka dhexe, oo dhan SL Sh **20,204,001,599**.

Sidaas darteed waxa cad in deynta sooyaalka ah ee soo taxnaynd mudada dheeri aanay ku jirin ku tala-galka Miisaaniyadda

Allaa Mahad Leh

Mohamoud Aw Abdi Ibrahim

Hantidhowraha Guud ee Qaranka JSL